



Folkhälsomyndigheten

Shardi ku aaddan baaritaan caddeynaya in uusan covid-19 qabin qofki ajnabi ah ee Iswiidhan soo gelaya

Waxay xukuumaddu go'aan ku gaartay in ajaaniibta ka imaanaya meelo ka baxsan waddamada woqooyin Yurub ay iska baaraan covid-19 oo aan cudurkana laga helin. Musaafirka waxaa khasab ku ah in uu xudduudka ku soo bandhigyo caddeyn muujineysa in uu is baaryay oo aan cudur laga helin. Waa in ay ugu badnaan 48 saac u dhexeyso markaa baaritaanka la sameeyay iyo xudduud ka soo gudbidda. Muwaadiniinta Iswiidhishka ama dadka ka imaanaya Norway, Finland, Danmark iyo Island uma baahna in ay soo bandhigaan caddeyn muujineysa in ay isbaareen oo aan covid-19 laga helin.

Noocyada soo socda ee baaritaanka covid-19 ayaa la oggolyahay: Baaritaanka antigen-ka, baaritaan PCR-ka iyo baaritaanka LAMP-ka iyo baaritaanka TMA-ga. Baaritaanka antigen-ku wuxuu jirya isagoo degdeg ah oo loogu tala galay infekshinka covid-19 ee markaas socda, waana baaritaan caadi ahaan lagu magacaabo baaritaan degdeg ah.

Macluumaadka soo socda waa in ay caddeynta ku qornaadaan si ay u shaqeeyso:

- Magaca qofka la baaray
 - Waqtiga qofka saamiga laga qaaday
 - Nooca baaritaan ee la sameeyay: Waa in uu noqdaa baaritaan antigen, baaritaan PCR-ka, baaritaanka LAMP-ka ama baaritaan TMA.
 - Natiijadi baaritaanka ka soo baxday
 - Magaca, nambarka taleefanka iyo cinwaanka cidda shahaaddada soo saartay ama sheybaarka baaritaanka sameeyay.
- Macluumaadku waa in uu si cad muuqdo isagoo ah af-Iswiidhish, af-Ingiriis, af-Norwegian, af-Daanish ama af-Faransiiska.

Hey'adda caafimaadka bulshadu [waxay ku talineysaa in dhammaan dadka soo gelaya Iswiidhan](#), iyadoon dhalasho loo eegeyn, ay habboontahay in ay is baaraan marka ay waddanka soo gelayaan iyo in ay ka fogaadaan in ay dad xiriir la yeeshaan muddo toddoba maalmood ah. Waxay taasi shaqeyneysaa iyadoon la eegeyn in qofka uu saaranyahay waajibka iska baaridda covid-19 inta uusan waddanka soo gelin ama in kale. Taladani ma khuseyso musaafiriinta si buuxda loogu tallaalay tallaallo ay EMA oggolaasho siisay (eeg EMA) ama tallaallo ay WHO oggolaasho ku meel gaar ah siisay (eeg WHO:s EUL) (micnaha kuwa la siiyay laba goojo oo tallaal ah, ayna laba usbuuc ka soo wareegtay marka ay goojada dambe qaateen).

Wax dheeraad ah ka akhriso:

[Su'aalaha iyo jawaabaha ku aaddan mamnuucidda soo gelidda waddanka](#)

[Macluumaad ku aaddan covid-19 oo luqado kala duduwan ah.](#)